



Federal Republic of Somalia
House of the People
Office of the Speaker

Ref: 0096 /1/B-10/17: الرقم

Mogadishu, 20th April 2017 التاريخ

Ku: Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Muqdisho.

Og: Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka
Muqdisho.

Og: Garyaqaanka Guud ee Dawladda.
Muqdisho.

Og: Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka
L/H. Golaha Shacabka.

**Ujeedo: Ansixinta Sharciga Soo Buuxinta Kursiga Ka Banaannaada
Golaha Shacabka Soomaaliya**

M.ne Madaxweyne;

Waxaan kugu wargelinayaa inuu Golaha Shacabka Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya go'aan ka gaaray ansixinta Sharciga Soo Buuxinta Kursiga Ka Banaannaada Golaha Shacabka Soomaaliya oo halkan ku lifaaqan, wuxuu Golaha Shacabka Kalfadhiga 1-aad ee Fadhigiisii 9-aad ee 19^{ka} Abriil 2017 oo ka dhacay Xaruntiisa Caasimadda Jumhuuriyadda ee Muqdisho ku ansixiyey cod furan oo u dhacay sidatan hoos ku xusan:

- Xildhibaan Oggolaadeen: 128 (Boqol Labaatan iyo Sideed) Xildhibaan.
- Xildhibaan diidey: 16 (Lix iyo Toban) Xildhibaan
- Xildhibaan ka aamustay 6 (Lix) Xildhibaan.

Haddaba, M.ne Madaxweyne waxaan si waafaqsan Qodobka 90-aad xarafka (f) ee Dastuurka JFS kaaga codsanaynaa in aad go'aanka Golaha ku oggolaato Xeer-Madaxweyne, si uu Sharci u noqdo looguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Juhuriyadda si waafaqsan Qodobbada 84-aad iyo 85-aad ee Dastuurka JFS.

Naga guddoon salaan diiran iyo qaddarin gaar ah.

M.ne Muxammad Sh. Cusmaan Jawaari
Guddoomiyaha Golaha Shacabka Soomaaliya



Tell: +252 612224442/+252 615577472


E-mail: speaker@parliament.gov.so

Website: www.sfp.so

ANSIXINTA SHARCIGA SOO BUUXINTA
KURSIGA KA BANAANNAADA GOLAHA
SHACABKA SOOMAALIYA.

Guddoomiyaha Golaha Shacabka Soomaaliya


Tirada Xubnaha Codeysay 150: Oggol (128) Diidmo (16) ka aamustay (6)



Saxiix: M. ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaari"

Taariikh: 19^{ka} Abriil 2017


Guddoomiye ku-xigeenka 1aad – Golaha Shacabka



Saxiix: M. ne Cabdiweli Ibraahim Sh. Muudey

Taariikh: 19^{ka} Abriil 2017

Guddoomiye ku-xigeenka 2aad – Golaha Shacabka



Saxiix: M. ne Mahad Cabdalla Cawad

Taariikh: 19^{ka} Abriil 2017





Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

SHARCIGA SOO BUUXINTA KURSIGA KA BANNAANAADA GOLAHA SHACABKA SOOMAALIYA

19^{ka} Abriil 2017

A handwritten signature in black ink, appearing to be 'Jes'.

GOLAHA SHACABKA SOOMAALIYA

- Markuu Arkay:** Xilalka iyo Waajibaadka Guddiga Federaalka Hirgelinta Doorashooyinka Dadban ee 2016 oo ay ku eg tahay Doorashooyinka 2016-ka.
- Markuu Arkay:** In lasoo gebagebeeyey laguna guulaystay doorashadii dadbanayd ee lagu soo doortay 275ta kursi Golaha Shacabku ku leeyahay Baarlamaanka 10^{-aad} ee Soomaaliya xilkana loo dhaariyey 27^{kii} Diseembar 2016;
- Markuu Arkay:** In doorashadii dadbanayd ee 2016 aan la samayn xubin-sugayaalkii buuxin lahaa kursigii ka bannaanaada Baarlamaanka Federaalka, si waafaqsan Qodobka 59 (2) ee Dastuurka Federaalka;
- Asagoo Xog Ogaal u ah:** In aan weli la dejinin sharciga doorashooyinka oo caddayn lahaa habraaca loo marayo xulashada xubin-sugaha 30 beri gudahood buuxin lahaa kursigii Golaha ka bannaanaada si waafaqsan Qodobka 59 (3) ee Dastuurka Federaalka;
- Markii Uu Hubsaday:** In aan weli la samayn sharcigii Doorashooyinka oo habraacan nidaamin laha;
- Saa Daraadeed:** Golaha Kalfadhigiisa 1^{-aad} Kulankiisa 9^{-aad} ee 19^{-ka} Abriil 2017 oo ay goobjoog yihiin Boqol iyo Khonton (150) xildhibaan wuxuu Guddomiyey Qodobbada soo socda:



Qodobka 1-aad:
Xilqaamidda Guddiga Madaxbannaan ee Doorashooyinka Qaranka

Taniyo inta laga meemlarinaayo Sharciga Doorashooyinka Hay'adaha Dawladda, maamulidda iyo maaraynta doorashooyinka dadban ee lagu soo buuxinayo kursigii ka bannaanaada Golaha Shacabka muddada xilhaynta Baarlamaanka 10-aad waxaa loo xilsaaray Guddiga Madaxbannaan ee Doorashooyinka Qaranka.

Qodobka 2-aad:
Habraaca buuxinta Kuraasta bannaanaata

Kursigii ku bannaanaada si waafaqsan Qodobka 59 (1) ee Dastuurka waxaa ku dhawaaqaya Guddoomiyaha Golaha Shacabka Soomaaliya una gudbinaya Guddiga Madaxbannaan ee Doorashooyinka Qaranka in uu soo buuxiyo kursiga bannaan ayadoo doorashadiisu loo marayo isla habraacii ergada doorashada dadban ee 2016 lagu soo doortay xubnaha Golaha Shacabka Soomaaliya.

Qodobka 3-aad:
Hannaanka Xallinta Khilaafaadka

1. Go'aannada la xiriira doorashooyinka kuraas buuxinta ee uu gaaro Guddiga Madaxbannaan ee Doorashooyinka Qaranka waxaa racfaan looga qaadan karaa Maxkamadda Sare oo go'aankeeda kusoo saareyso muddo 30 beri gudahood.
2. Go'aanadii uu horey u gaaray Guddiga Xallinta Khilaafaadka Doorashooyinka Dadban ee 2016 waa kama dambays oo sidood ku hirgalaya, Maxkamadda Sarena waxay geli kartaa oo keliya racfaannada laga soo qaato go'aannada Guddiga Madaxbannaan ee Doorashooyinka Qaranka ee ku saabsan buuxinta kuraasta ka bannaanaata muddada xilhaynta Golaha Shacabka ee Baarlamaanka 10-aad ee Soomaaliya.
3. Hannaanka khilaaf bixinta Maxkamadda Sare ee la xiriira Doorashooyinka buuxinta kuraasta ka bannaanaata Golaha Shacabka ee Baarlamaanka 10-aad waxay ka bilaabanaysaa maalinta Sharcigan uu ansixiyo Golaha Shacabka, waxayna ku koobnaan doontaa keliya Kuraasta ku bannaanaata asbaabta ku xusan Qodobka 59 (1) ee Dastuurka Federaalka.



Qodobka 4-aad:

Xil Wareejinta Guddiga Federaalka Hirgelinta Doorashooyinka Dadban 2016 iyo Guddiga Xallinta Khilaafaadka

1. Guddiga Federaalka Hirgelinta Doorashooyinka Dadban ee 2016 iyo Guddiga Xallinta Khilaafaadka Doorashooyinka Dadban oo xilhayntoodi dhammaatay waxaa la faraya in xilalkoodi iyo dhammaan kaydka dokumentiga Doorashooyinka 2016 ay ku wareejiyaan Guddiga Madaxbannaan Doorashooyinka Qaranka.
2. Guddiga Madaxbannaan ee Doorashooyinka Qaranka waxaa la faraya in uu haddiiba u hawlgalo xilkana kula wareego si waafaqsan Qodobka 111G ee Dastuurka Federaalka.

Qodobka 5-aad:

Dhaqangal

Sharcigan wuxuu hirgalaya ka dib markii uu Golaha Shacabku ansixiyo, Madaxweynahana ku meelmariyo Xeer-Madaxweyne laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jumhuuriyadda.

